Warqadda Xaqiiqada Qorshaha U-tabaabusheysiga Cudurada dhaqsaha u faafa 'Pandemic-ga'

Qorsha Guddoonka Peel ee 'Pandemic-ga' wxuu xoog-saaraya in ay ardayda, shaqaaluhu badbaado ku waraan

---

Waa maxay ' pandemic' ?

Waa cudur kasta oo la is qaadsiyo oo si dhaqsino u faafa. Ifilada (influenza) ayaa noqon karta nooc ka mid pandemic—'pandemic flu' waa cudur cusub oo aad la isu qaadsiyo oo ka dhasha 'virus' waxyeeleeyana hab-dhiska neefsashada oo soo shaac-baxa marki ay timaado ifilo cusub oo u keeno 'virus', tasoo dadka asiibta si dhaqsino ahna u faafto. Jirka Adanahu weey yar tahay ama maba laha wax u isaga difaaco virus kaan cusub.

Goormu pandemic-gu dadka asiiba?

Khuburadu ma ay sii sadaalin karan marka u pandemic-ga kan ku xiga u dadka asiibi doono, lakin sida ay taarikhdu sheegayso 100kii sannaba seddex ama afar jeer ayeey arrintaan dhacdaa. Masu'liyiinta Ururka Caafimaadka Adduunka, dowladda federalka, dowlad goboleedka iyo tan degaanku waxey bilabeen qorsheynta u tabaabusheysiga pandemic-ga.

Meeqa qof ayeey arrintani saameeyn-doontaa?

Khuburadu waxey leeyihiin waxaa suurowda in muddada uu cudurka pandemic-gu socdo in boqolkiiba 40 ilaa iyo 60 oo shaqaale ah ay shaqada ka maqnaadaan. Dad badan oo shaqo ka maqnaada waxey keeni karta in Guddoonka Peel u baajiyo adeegyo u dadka u fidin jiray.

Waa maxey qorsha pandemic-ga ee guddoonka Peel?

Guddoonka Peel si fiican buu pandemic-ga isugu diyaariyey. Inta lagu dhex-jiro sannad dugsiyeedka, guddoonku waxuu sameeyey qorsho dugsiyadooda iyo goobahooda shaqada loogu diyaarinayo pandemic-ga. Guddoonku markuu qorshaan diyaarinayey waxa si fiican ugula shaqeeyey Qeeybta Caafimaadka ee Peel iyo wasaaradaha waxbarashada iyo caafimaadka, waxaa kale oo kala shaqeeyey itixaadka iyo ururadooda shaqaalaha.

Haddii ay dhacdo in Ontario laga xaqiijiyo jiritaanka pandemic-ga, guddooka Peel waxuu tabagelinaya qorshihiisa pandemic-ga. Inta lagu dhex-jiro xaalada pandemic-ga, guddoonku waxuu raacaya talada iyo hagaaminta saraakiisha caafimaadka dadweynaha ee gobolka iyo degaanka oo khibrad u leh qiimeeynta heerka halista caafimaad ee xalaadaasi aay keeni karto.

Muhimaddeena muddada pandemic-gu waa in ay dugsiyadu sii furnaadaan ilaa iyo inta lagu badbaadayo inaan sidan sameyno ama aay si kale nagula taliyaan masu'liyiinta waaxda caafimaadka dadweynaha Ontario. Haddii u soo shaacbaxo dareen laga qabo caafimaadka iyo badbaadada shaqaalaha iyo ardayda, guddoonku waxuu tixgalin doonaa xiridda dugsiga iyo goobta.

Inta lagu jiro xaaladda pandemic-ga howluhu ma sidoodi caadiga ahaa ayeey u socon doonaan?

Haddii xaalada pandemic-ga looga dhawaaqo Ontario banaankeeda, guddoonka Peel waxuu sii wadidoona fidinta adeegyadiisa caadiga ah waxuuna howsha u sii wadidoonaa sidiisi hore. Mar alla marki xaaladda pandemic-ga looga dhawaaqo Ontario, goddoonku waxuu tabagalinayaa qorshihii u-diyaar garowga xaaladda pandemic-ga. Sidaas daradeed, howlo badani wey sii socon doonaan, hase

yeeshe waxey u shaqeeyn doonaan si aad ugu duwan sidii hore. Inkasto oo dugsiyadu ay furnaan doonan inta lagu jiro xalaad pandemic oo Ontario looga dhawaaqay, waxaa dhici karta in barnaamijka caadiga iyo adeegu ayan u fulin sidii laga filaayey.

Howlahee sidoodi u sii socondoona inta lagu dhex-jiro xaalad pandemic ah oo Ontario looga dhawaaqay ?

Sidii kor loogu soo cayinay, howlaha badidoodu wey sii socondonaan inta lagu dhex-jiro xaalad pandemic ah oo Ontario looga dhawaaqey. Hase yeeshe, waxaa dhici karta in howlahaan loo fuliyo si aad uga duwan sidii hore, taaso keeni karta in heerarka laga filaayeey fulinta adeega caadiga ah ay ka heer hooseeyaan. Waxaan rajeeyneynaa inaan sii wadno fulinta howlaha soo socda ilaa iyo inta loo arko iney ku haboon tahay in saas loo fuliyo:

- wax-farid, qiimeeyn iyo warbixin
- gaadiidka ardayda – basasku sidoodi caadiga ahayd ayeey jadwalkooda u sii waadayaan inta dugsiyadu ay furan yihiin
- xanaanada caruurta – meelaha caruurta lagu xanaaneeyo wey furnaan donaan haddi ayan taasi keneeyn badbaado daro
- macalimiinta aan joogtada ahayn – maamuleyaashu si ay u xaqijiyaan heer ku haboon waxbaridda iyo kormeerka duqsiyada waxey awood u yeelan doonaan in ay keensadan maacalimiin aan joogto ahayn
- dadka iskaa-waxuqabso ku shaqeeya – nidaamka caadiga ah ee ku saabsan dugsiyada Peel si joogta ayaa dib loogu eegi doona
- adeegyada makhaayada iyo barnaamijyada martigelinta
- adeegyada gacan-ku haynta – oo ay ku jiran lakiin aan ku koobneyn oo keliya kuleyl-siinta, qaboojinta hawada, howsha dhumaha biyaha qaada, korontada iyo kombiyuuter hagaajinta
- qashin uruurinta
- amniga goobaha adeegya lagu fuliyo– haddii dugsiyadu xiranyihiin, waxaa lagu talagalaya ilaalo dheeri oo ku dulwareega goobaha
- shirarka guddoonka – waxaa suurtowda in si joogta ah loo qabto iyo/ama la isticmaalo habka elootroniga ah
- kooxaha ka jawaaba dhacdada khatarta ah– weey shaqeeyn doonaan, lakiin looma isticmaali doono sidii caadiga ahayd
- dalabka qalabka dugsiga
- daabacaada iyo dhanbaal is-gaarsiinta hey'adda dhexdeeda

Howlahee ba la laali doona inta lagu dhe-xjiro xaalad pandemic ah oo Ontario looga dhwaaqay?

Si aan beelaheena u gaarsiino adeegyada duruuriga ah, howlaha soo socda waa la laali doona inta ay socoto xaalad pandemic ah:

- howlo ka baxsan manhajka waxbarashada
- barnaamijyada cuntada oo lagu qabto dugsiga– sida maalmaha 'pizzada'
- safarada lagu aado goobo xiiso leh/dalxiis gaaban– waa la baajin doona dhamaan safarada lagu aado goobo xiiso leh/dalxiis gaaban, oo ay ku jiraan kuwo horey loo qorsheeyey oo ay qoysasku kharjkooda bixiyeen
- shirarka guddiga dugsiga– maamuluhu waxuu si joogta u la xiriiridoona guddoomiyaha guddiga dugsiga
- howlaha horumarinta xirfadda 'professional'
- shirarka shaqaalaha– shirarka ay maamuleyaashu ama shaqaaluhu u aadan meel ka baxsan dugsiga banaankiisa waa la baajin doona ama waxaa la isticmaali doona habka 'teleconference' oo ay u shiran dadka meelo kala dheer jooga
- ruqsadda tahsilaadka saacadaha duqsiga la dhigto kadib – ruqsooyinga isticmaalka tahsilaadka dugsiga oo horey loo bixiyey ama kuwa cusub

- waxbarashada ay si wataan dadka waa-weeyn– dugsiga habeenkii la dhigto, dugsiga xagaaga la dhigto iyo barnaamijka luqadaha adduunka
- isticmaalka beesha ee dugsiyada– howlaha saacado dugsiyeedka kadib /fasaxa isticmaalidda dugsiyada beesha
- guri wax-ku baridda

Inta lagu dhex-xjiro xaalada pandemic-ga ah oo Ontario looga dhwaaqay, sideebu guddoonka Peel wararka ula socodsiin doona shaqaalahiisa iyo beesha?

Guddoonka Peel waxuu u balan qaadaya in dhamaan shaqaalaha, walidiinta iyo xubnaha beesha u warbixin joogta ah ka siindoona hadba xaalada ay marayaan qorshooyinkoodu. Guddoonku waxuu sameeyey qorsho war-isgaarsineed oo dhameeystiran si loo hubiyo in dhamaan dadka la xiriira ay u helaan warbixin joogta ka hor iyo inta lagu dhex-jiro xaalad pandemic-ga ah oo Ontario banaankeeda looga dhawaaqay, iyo marka xaladaas laga xaqiijiyo Ontario gudaheedaba.

Inta lagu dhex-jiro xaalad pandemic-ga ah oo Ontario looga dhawaaqay, guddoonku waxuu warbixin guud iyo xaalada dugsiyda ka tabin doona labo ilood oo waa weeyn: shabakada internetka ee guddoonka Peel—www.peelschools.org—iyo laayn teleefoon oo u gooni ah pandemic-ga.

Waxaan bilaha soo socda sii wadi doonaa ka shaqeeynta qorshaha ka tabaabusheysiga pandemic-ga, waxaan kale oo si wadi doona in aan idinka qeybgelino ka-warqabka wararka cusub.